



Hagidda Novel coronavirus (COVID-19)
(Novel coronavirus (COVID-19) Guidance)

Taageerada Maalin Kasta Ioo Qoondeeyay Qoyska iyo Foomka Su'aalaha Qoraalka ah ee Baaritaanka Soo Booqdaaha ee Kusaabsan Daryeelka Fudud
(Daily Designated Family Support and Visitor Screening Questionnaire in Acute Care)

Waxaan u baahan nahay inaad ka jawaabto su'aalaha hoos ku xusan si ay nooga caawiyaan bal in soo booqashadaada maanta ay kasii dhigeysa biiada mid badbaado leh. Waa inaad ka shaqeeyso nadaafadda gacmaha sidii ay tilmaameen kooxdaada caafimaadku.

Foomka su'aalaha qoraalka ah waxaa uu un la xiriiira **calaamadaha cusub** ama **kasii daraya** ee la xiriira xasaasiyadaha, xaaladaha halista ah ee raagay iyo kuwa horay usii jiray. Dadka qaba calaamadahaas la xiriira xaalado horay usii jiray wali way soo booqan karaan.

1.	Miyaad qabtaa wax ka mid ah astaamaha soo socda kuwaasi oo soo muuqday 10kii maalmood ee ugu dambeeyay MIYAYNA cusub yihiin ama kasii darayaan: <ul style="list-style-type: none"> • Qandho • qufac • neefta oo yaraato • neefta oo dhib noqoto • dhuun xanuunka • duuf sankaa kaa socda • Ama miyaad dareemeysaa matag iyo/ama shuban 48kii saacadood ee ugu dambeeyay 	Haa	Maya
2.	Miyaa lagaa helay COVID-19 10 kii maalmood ee ugu dambeeyay amase aad sugeysaa natiijada COVID-19 oo lagaaga qaaday astaamaha aad qabto dartood?	Haa	Maya
3.	Miyaa lagu amray inaad gooni dadka isaga soocdo* 14kii maalmood ee ugu dambeeyay?	Haa	Maya
4.	Miyaad kusoo laabatay Canada adigoo ka yimid dalka dibaddiisa (sida USA) 14kii maalmood ee la soo dhaafay?	Haa	Maya
5.	Miyaad ka agdhowaatay* (fool-ka-fool ilaa 2 mitir wax ka yar/6 fiit) 14kii maalmood ee lasoo dhaafay qof jirran** ama leh mid ama ka badan astaamaha lagu liis gareeyay gudaha su'aasha #1?	Haa	Maya
6.	Miyaad ka agdhowaatay* 14kii maalmood ee lasoo dhaafay qof la baarayo*** ama la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19?	Haa	Maya
7.	Miyaad xiriir la leedahay meel ama xarun uu ka dillaacay safmarku laguna amray in lagu baaro ama aad dadka gooni isaga soocdo?	Haa	Maya

Haddii aad uga jawaabto 'HAA':

- **Su'aasha 1 ama 2** ma awoodid hadda inaad soo booqato in aad tahay mooyee taageero qoys oo la qoondeeyay oo lagama maarmaan u ah qof carruur ah oo bukaan ah ama qof kugu xariira oo qaangaar ah (haddii aan taageero kale la heli karin) ogolaanshana aad ka haysato goobta daryeelka.

- **Su'aalaha 3-7** ma awoodid hadda inaad soo booqato **haddii aadan** qabin astaamo mooyee aadna tahay taageero qoys oo la qoondeeyay oo lagama maarmaan u ah qof carruur ah oo bukaan ah, qof dhalay ama qof kugu xariira oo qaangaar ah (haddii aan taagero kale la heli karin). Goobtaada daryeelka maamulkeedu waa inuu ka warqabo baahida aad u qabto gooni inaad dadka kale isga soocdo ka hor intaadan soo galin.
- **WIXII su'aal ah ee aad qabto** ka buuxi aalada qiimaynta shaqsiga barta ahs.ca/covid si aad u go'aamiso in lagaa baaro COVID-19.

Haddii aad uga jawaabto "MAYA" dhammaan su'aalaha sare, waad sii wadi kartaa booqashadaada. Haddii aad yeelato wax ka mid ah astaamaha kor lagu soo xusay, fadlan kala hadal daryeelahaaga caafimaadka mar kalana halagu baaro.

**Xasuusnoow:****(Note:)**

1. Haddii aad qabto wax kaloo astaamo ah oo cusub ama isbaddal ku yimid astaamahaagii caadiga ah, waa inaad guriga joogtid aadna yareyso la kulanka dadka kale ilaa aad ka soo reysato.
2. Baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan karaa in lagugu sameeyo adoo jooga goobta daryeelka.

*La kulmid aad ah waxaa ku jira bixinta daryeelka, inaad la noolaato ama haddii kale aad ku dhawaato muddo dheer (2 mitir kayar) intii qofku jirranaa, ama aad taabato dhacaammada jirka qof fayraska qaba ka yimaada (sida markii uu qufaco ama uu hindhiso) asagoon qabin maaskaro ama wax badbaadiya wajiga/indhaha in dhan 15 daqiiqo ama ka badan.

** 'jirro' macnaheedu waa qof qaba astaamaha COVID-19 ee ku xusan liiska kor lagu soo xusay.

*** 'La baaray' macnaheedu waa qof kastoo sugaya baaritan astaamo uu qabo aawadood, inuu ka agdhowaaday qof qaba astaamaha COVID-19 ama lala xiriiriyay meel safmarku uu ka dillaacay ayadoo lagula taliyay in la baaro iyo/ama inuu dadka gooni isga sooco